

# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

**Kal-fadhigii 40<sup>aad</sup> Fadhiigii 21<sup>aad</sup>**

**Axad 04 Aug, 2019**

**Quraanka:** - Md Faarax Maxamuud Cabdulle

**Gudoonka:** - Gudoomiye Md. Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle

**Ajandaha Fadhiiga:**- Doodda Xeerka Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka sida

**Gudoomiyaha:** - Mudanayaal waxaynu u balan sanayn dooda Dooda xeerka xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka sida

**Md. Maxamed Faarax Qabile (2min 05sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Golaha aad ayaan u salaamayaa. Xeerkan marka la eego mabaadiida guud ee qaybta mabaadiida guud ee dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. Dastuurku waxa uu muwaadiniinta siinayaa xuquuq siman oo aan loo kala eegayn rag iyo dumar.

Waxaad moodaa in raga iyo dumarka la kala qaaday marka la eegayo xuquuqda hawlgabka ee ciidamada Qaranka Somaliland oo haweenkiina loo gooyey da' gaar ah, ragiina la gooyey da' gaar ah darjana waa meesheed, laakiin xaga da' da waxaan leeyahay ha la simo rag iyo dumarka oo da' isku mid ah ha laga dhigo.

Laakiin da' da la kala qaybiyey ee la yidhi dumarku intaasay hawlgabka ku galayaan ee la leeyahay saddex alif lihii intaas ayuu ku galaya, sarkaalkii sare intaas ayuu ku gelaya ma garanayo wax loo eegay. Qodobka kaliya ee sheegaya in khibrad laga maarmi waayo loo daayo waa sax waa ayimadayaa, laakiinse xuquuqda kale ee muwaadiniinta ee hawlgabka ciidamada qaranka waa inay sinaataa.

Waxaan soo jeedinayaa Xaga da' da haween ha noqoto, alifle ah noqdo, general ha noqdo ama wuxuu doonee ha noqdee in xaga da' da hawlgabka laga wada simaa. (Seconded).

Goddoomiyaha: Wuu mahadsan yahay xildhibaan Maxamed Faarax Qabile, waxaan imika ku soo dhawaynahaa

**Md. Maxamed Xuseen X Ciise (8min 25sec):-** Bismilaahi Raxmaani raxiim. Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha Golaha way salaaman yihiin. Salaamu Calaykum Warax Matulahi Wa Barakaatu.

Xeerka xaqsiinta waxaan hayaa xeerkaa iyo soo jeedintii Guddida. Guddidu waxay wax ka bedeshay oo kaliya saddex qodob. Guud ahaan siday Guddidu u soo jeediyeen waan ku taageerayaa, waayo aad ayey u kooban tahay siday wax u soo jeediyeen way ku saxsan yihiin.

Hawlgabka dumarka ee ay ku soo dareen aad baa loogu baahnaa, waanay fiican waa taageerayaa. Xeerka intaan ka eegaa sixitaan ayuu u badan doonaa.

Qaybta koowaad waa cutubka tilmaamo guud. Waan sax erey bixintu, laakiin inay si kale u qoran tahay ayaad moodaa, markaa waxaan leeyahay eray bixinta ha loo qoro sidii eray bixinta loo qori jiray. Halka farqada 8aad.

Hay'ad waxa loola jeedaa waa hay'ada xaqsiinta iyo hawlgabka Ciidanka way isku daba qabteen, laakiin wax aka horayn lahayd hay'ad waxa loola jeedaa waa hay'ada hawlgabka iyo xaqsiinta ciidanka ayaa looga jeedaa. Markaa halkaa ha la saxo oo sidii xeerka ha loo qoro.

Xeer-nifdaami; waa xeer qeexaya oo ka farcamaya xeerkan.

**Qodobka 4aad:** Hay'ada Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada Qalabka sida. Siday u qoran tahay ma farqadaysna oo laba farqadood ayey noqon lahayd. Siday hadda u qoran tahay waxay noqonaysaa farqada 1aad; Hay'adda xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka sida waxa aasaasi doona xeer uu soo saari doono Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, iyada oo la waafajinayo xeerkan. Kaas oo qeexi doona qaab dhismeedka iyo waajibaadka hay'adda. Intaas waxa qeexi doona hay'adda in sidaas loo qoro weeye.

**Farqada 2aad** waxay ka dhigan xeerkan iyo xeer nidaamiyaha ka farcamay waxa lagu maamuli doonaa si xeerkan waa faqsan.

**Qodobka 5aad** waxay ku soo qoreen u jeedooyinka. Sidan aan xeerka ku naqaano, xeerkan waxa qoray guddida aan aqoon u lahayn xeerarka. U jeedo marka laga hadlayo waxay sheegayaan u jeedada guud ee xeerka, halkana wax aka muuqata sugnaashaha, markaa ha la bedelo oo anigu u jeedooyinka farqad ayaan ka dhigay waxaan iodhi; waa in la helaa xeerka iyo nidaam lagu maamulo xaqsiinta iyo hawlgabka ciidanka qalabka sida ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Markaa halkan u jeedooyinka lagu qoray u jeedooyinka maahee waxaan ka dhigay sugnaanshaha xaqsiinta iyo hawlgabka Ciidanka qalabka sida weeye. Afartaa farqadoodana waa caadi wuu qaadanayaa.

**Qodobka 12aad** sida guddida ayaa sax oo aan qaatay. Meelaha qaar ayaa xeerka sixitaan u baahn oo kaliya.

**Qodobka 21aad:** Abuurida sanduuqa shaqaalaha sanqiinta iyo Hawlgabka. Farqadiisu waa 4 farqadooda, markaa farqada 4aad Qodobka 4aad ayaa sheegaya, waxaan odhan lahaa yaan lagu celin, waxaan u dhigi lahaa farqadaas, sida “ Hay’adda Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada Qalabka sida ayaa maamuli doonta sanduuqa, iyada oo raacaysa sida xeerkani tilmaamayo”.

**Farqada 4aad xarafka B** waxa ku qoran lacagta ku jirta hawlgabka iyo xaqsiinta ciidamada Qalabka Sida. Waxay u qoran tahay si qaldan waxaan idhi; “Sanduuqa Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka Sida, looma weecin karo sifo kale oo aan ahayn hawlgabka iyo xaqsiinta”.

**Qodobka 22aad,** waxa ku qoran xeer nidaamiyaha xeerkan. Xeerkan xeer nidaamiyihiisa waxa soo saaraysa hay’ada hawlgabka. Sida hada u qoran waxa soo saaraysa ayaa la yidhi hay’ada hawlgabka iyo xaqsiinta.

**Qodobka 24aad:** waa sixitaan oo halkaa **Golaha Sharci dejinta** ha laga dhigo ayaan leeyahay “**Golayaasha sharci dejinta**” halka dhaqan galka ha laga dhigo “**Golayaasha barlamaanka**” sidaas ha laga dhigaan leeyahay xeerku waa muhiim. Aslaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

**Md. Maxamuud Axmed Obsiiyey (6min 29sec):-** Bimilahaai Raxmaani Raxiim. Almaxdulillah, salalahu cayhi, wacalaa asxaabihii muxamad. Aslaahi Cayli Wasalam.

Anigu horta xeerkan waxaan codsanay in aanu soo akhrino, laakiin markaan isha mariyey waxaan ogaaday in aanay suurtoagal ahayn in xeerkan sidan lagu qaato, sababta oo ah marka ugu horaysa ilaa imika xeerkaa Ciidanka Qaranku ilaa hadda muu soo gaadhin Golaha, markaa waa kaw.

**Point of order: Cabdilaahi Xuseen Cige.** Xildhibaan xeerka ciidamada qalabka sida waxa 1995, waxaana ansixiyey Golihii golahan ka horeeyey waana xeer dhaqangal ah oo shaqeeya.

**Md. Obsiiye:-**Haddii ay sidaas tahay waxaan u baahan in aan aragno, si wixii ka maqan halkan lagu daro iyo waxyaabo fara badan waa lagama maarmaan. 1995 xaalada iyo duruufaha taagnay waxa laga yaaba in maan is bedel ka jiro, taa haddii la hayo in naloo raaciyo ayey ahayd oo la ogaado wixii lagu bedelayo.

Xeerka kale isna muhiimka ahi waa xeerka darajada oo sheegaysa goorta la siinayo iyo goorta laga qaadi karo, shuruudaheeda, inta sanadood ee uu sugayo dalacaada iyo siday u dalacayaan. Xeerkaas waxa lagu dhaqangeliyey wareegto, waxaana waajib ah inuu Golaha soo maro xeerku ama ha ku jiro xeerka guud ee ciidanka ama si gaar ah ha loo keeno.

**Point of order: Cabdilaahi Xuseen Cige.** Xeerka Police iyo xeerarka kaleba waxaynu ku samaynay qaabka ay ciidamadaasi derajada u helayaan iyo cida bixin karta.

**Md. Obsiiye:-**Xagee ayuu ku yaalaa?

**Point of order: Cabdilaahi Xuseen Cige.** Waxa uu ku yaalaa xeerka Ciidanka Police iyo Xeerarka kale ee aynu samaynay.

**Md. Obsiiye:-**Xeerarku waa muhiim wax badan way ka dhaceen darajooyinkaas oo dad xaq u leh iyo kuwo aan xaq u lahayn oo la rabay in la dalac siiyo oo aan la dalacsiin, waxa lagu saleeyeyba la garan maayo. Xaqiiqatan marka loo eego mushtamicii waanu ku dhax jirnaa, ciidanka waa lanoogu jiraa, shacabkii baanu matalaynaa, askartaanu matalaynaa, waxa muhiim si cad oo kaleer ah xeerkaasi meesha u yimaado.

Markaa xildhibaanu waa ay mahadsan yihiin, taasi cudur ma noqonayso waa xil na saaran in aanu xuquuqda u raadino waad mahadsan tahay Xildhibaan.

Ta labaad xeerkan waxa ku jira oo aan isha mariyey in Wasaarada maaliyadu kala badh bixiso sanduuqa xaqsiiinta ciidankaas oo dhan. Ciidankaasi oo xaqsiiintoodu u baahan tahay in la tiro koobo, in la helo mushahar ku filan oo laga jari karo inta kale oo inta ay bixinayso Xukumadu waa inay Miisaaniyada ku cadaataa. Miisaaniyaddii way soo socotaa in lagu darro ka baddina lagu ansixiyo xeerka. Laakiin inta aanu ansixino oo miisaaniyadana lagu sooo dari waayo waa mushkilad ee yeynaan been isku sheegin.

Mid kale sanduuqa waxa la yidhi mushaharkooda ayaa badh laga jarayaa, waxa aan leeyahay sanduuqan ma laga wada jarayaa dable, alifle, kabtan, kaashaanle iyo wixii ka sareeya laga jaro, maxaa laga jarayaa 850,000 SL.SH ayuu qaataa askarigu marka laga jarro 1/3 maxaa u soo hadhaya oo uu ku noolaanayaa. Taas waxa ka horaysa in marka hore musharka la qiimeeyo oo la ogaado wuxuu askarigu qaato, taasaana ka horaysa in marka hore miisaaniyada loogu darro.

**Point of order: Cabdilaahi Xuseen Cige.** Guddoomiye haddaba waa laga jaraa imika oo miisaaniyada iyo mushaharka ay qaataan waa lagu darraa.

**Md. Obsiiye:-**Isla markaana xeerkan waxa ku qoran hawlgabka iyo xaqsiiinta waxa iska leh askariga ku dhinta ama goob dagaal amah awl Qaran oo markaa uu hayo. Markaa kii kale miyaanu xaq u lahayn waabay bixiyaan oo waa laga jaraaye oo xeerkan iyadana ku arkay. Waxa halkan ku jirta ninka hawl ku dhinta ayuunbaa la siinayaa, waxaana muuqata in ciidanka la kala sooc.

Miisaaniyada waa inay ka muuqata sanduuqaa wixii la gelinayo, in mushaharka dib loo eego, isla markaana waxa ku jira miisaaniyadda sanadkan 1500 oo Shaqo Qarantiiya. Qof kasta oo Shaqo Qarantiiya inay Miisaaniyadda ku jiraan. Markaa waxyaabo badan ayaa xeerkan ka horeeya si loo ansixiyo.

Waxaan soo jeedinayaa xeerkan dib ha loo dhigo, hana la soo buuxiyo wixii shuruudo ah ee waajib ah si aynu u ansixino. Wa bilaahi Tawfiiq.Salaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu.

**Guddoomiyaha Axmed-yaasiin Sh. Cali Ayaanle:** Mudanayaa waxaynu waxa ku nahay waa ciidamada, markaa in xeer xaquuqdooda sugayaa inaga baxaa inana taariikh iyo ajri ayey inoo tahay, iyagana waa xaquuqdoodii. Xeerkani wuu kooban yahay mudanayaa oo wax ku kordhin iyo wax ka bedelba waa waxaad uga doodaysaan in si wanaagsan loo soo akhriyo dooduna barri xagaas inooga sii socoto fadhiguna wuu inoo xidhan yahay.

**Md. Ibraahim Jaamac Rayte (6min 06sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Runtii xeerkani wuxuu ka mid noqon doonaa xeerka Hawlgabka Qaranka Somaliland, runtii siday wax u socdaan xeerarku way is dhalaan oo xeerkaa wax dhali lahaa ayaa wixii uu dhali lahaa uu ka hor dhashaa. Matalan xeerar badan oo hoos iman lahaa xeerarka gacansiga Banka, xeerarkii ka dhalan lahaa ay ka hordhasheen.

Xeerarka mabaadii guud ayaa ka dhaxaysa, maanta se haddii kani inoo yaalo, waxaan qabaa in mid kale lala sugune ay ansixino. Waxa qudha oo aan ku dari lihii oo aad moodaa inay ka maqan tahay siyaasadii guud iyo mabaadiidii guud ee hagi lahaa xeerkan. Waayo mabaadiida guud waa waxa hagidiisa, turjumaadiisa iyo dhaqangelintiisa qayb ka ah.

**Qodobka 2aad** hay'ad halkan lagu abuuray oo hal qodob ayaa ka hadlaaya oo **qodobka 4aad** ah waa hay'ada xaqiinta iyo Hawlgabka Ciidanka, markaa waxaan leeyahay hal qodob hay'ad lagu aasaasee, waxay u baahan tahay qaab-dhismeedii, haylkalkeedii, maamulkeedii iyo ciday hoos imanayso wexeeda oo dhami inay u dhamaystiran yihiin.

Waxaan odhan lahaa hay'ada maadaama oo ay halkan ka maqan tahay qodobka lagu magacaabay mooyaane in xeer gaar ah oo aan kan wax badan ka dambayn loo sameeyo oo lagu aasaaso hay'ada xaqiinta iyo Hawlgabka Ciidanka.

Markaan intaas dhaafo qaabka waxaan ku raacsanahay arimaha qaabka hawlgabka in uniform laga dhigo oo saraakiisha iyo saraakiil xigeenada way kala dheeraan karaan, laakiin muddada hawlgabka ee qaranka oo la sameeyo. Hadeer caalamku imika waxa isku wada raacsan yihiin oo ay hawlgabka ku galaan waa 65 sano jir.

Laakiin inka sarkaalka ah ama jananka ah inuu muddo ciidanka la sii joogaa waa wax maquul ah oo isagu hawlgabkiisa ku galo da' dheeraada. Arrintaas waxaan jeclaan in la waafajiyo isdaandarka caalamiga ah, xeerku waa xeer maalintiisii jooga, xeerka kale ee kaabayaa isna waa xeerka hay'ada Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka waa in si deg deg ah loo keenaa isna.

Guddoomiyaha: wuu mahadsan yahay, waxaan isna ku soo dhawaynayaa Xildhibaan,

**Md. Faarax Maxamuud Cabdulle (10min 35sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Alxamdulillah. Aslaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Waxaan la qabaa xeerkan mudanayaashii inaga horee. Horta xeerkaa darajada ciidanka maynaaan ansixin, ciidamadu xeerar ayey leeyhiin wali maynaan ansixin xeerkaa ciidanka Military-ga. Waxa soo horeeyey xeerkan Xaqsiinta, waxaan soo jeedinayaa in isna la keeno oo Goluhu ka hawlgalo sidi loo keeni lahaa xeerarka dhiman.

Maadaama oo aynu gacanta ku hayno kan oo aan badnayn, laakiin dhawr qodob ayaa is dultaagay sida **Qodobka 2aad** waa eray bixinta oo maadaama oo aynaan ansixin xeerkaa darajada waxbaa qabyo ka noqonaya.

**Qodobka 2aad farqada 3aad** halka ay ku qoran tahay sarkaal xigeen laba alif iyo saddex alifle ama xarfaha K iyo S waxa laga u dhigan yahay xadhigle, laakiin waan in la cadeeyo K S wixii loogu talo galay in halkan lagu cadeeyo maadaama oo ay eray bixintii tahay dhawr meeloodna uu kaga jiro xeerka.

Matalan **Qodobka 12aad** da' da hawlgabka lagu galayo, waan la qabaa wixii dawlad ama Qaranka u shaqeeya ama ciidan ha ahaadeen ama shaqaale kale ee rayidka ahba. Wax alaale wixii shaqeeya In hawlgabkoodu noqdo wakhti sku mid ah waa arrin maquul ah. Xeerkan sidan guddidu u soo qortay qodabkan iyo sida xukumadu ku keentay ma kala duwana.

Anigu waxaan soo jeedinayaa taasna in ninka Matalan 55 jirka ahi ama 50 jirka ahi waa nin xoog ah, nin la odhan karo hawlgab ayaad tahay ama sarkaal ah ahaado ama alif ama wuxuu doona ahaadee iguma muuqato ninkaasi waa hawlgab ee shaqada ha ka fadhiisto. Hawlgabka marna qofku da' ayuu ku noqon karaa marna wax kale oo ku soo kordhay, laakiin marka ay xaga da' da tahay waxaan qabaa ninka aliflaha iyo am aka hooseeyaa uu ku gali karo oo laga dhigo 65 jir ayaan soo jeedinayaa.

Saraakiisha kale eek a bilaabmaysa xidigle ilaa gaadhaanle sare inay ku gali karaan ayaan qabaa da' da 75 qaar ayaa ka badan kara, markaa waxaan garanaynaa arag badan oo ku gali kara, waxa kale oo aan qabaa in sareeye Guuto ama sareeye gaas ayn iyaguna ku geli karaa ilaa 80 jir, kuwa kale ilaa 70 jir ayaan qabaa anigu.

In ragii oo shaqaynaya oo xoog ah oo aqoontii leh in la yidhaa iska fadhiista aniga iima muuqato, waxaan qabaa in ay shaqeeyaan. Ninka ciidanka ilaa uu 80 gaadho waa sax inuu shaqeeyo oo haddii aanu caqligiisu I bedel aan la bedelin oo aqoontiisa iyo khibradiisa laga faa'iidayso.

Qodobka 13aad waxa isna halkan ku qoran xubintii dhaawacanta ama wax gaadhaan. Anigu waxaan qabaa qofkii dhaawacma ee sidaas hawsha ku gala xuquuqdiisa kale iyo xaqsiintiisa kale waa gaar, laakiin mushaharkii maadaama uu qaranka u dhaawacmay in musharahkiisa oo dhamaystiran uu qaato. Waxa kale oo aan qabaa ka ku dhinta ama ka

waxyeelo ka gaadhay oo uu dhinto musharahka lagama jarayo ilaa ilmihisa yari gaadhayo 15 jir.

Waxa kale oo ay halkan ku qoreen in mushaharkiisa la siiyo 80%, waxaan anigu soo jeedinayaa in la siiyo mushaharkiisa oo dhamaystiran markaa ayaan laga jarin 20% hadhay, waayo in badan ayuu qaranka u shaqaynayey, qaranka in u shaqaynayey markaa waa in loo dhamaystiraa. Ta kale marka uu dhinto dhaxlayaasha isna 80% ayaa la siinayaa ayey yidhaahdeen. Taasna waxaan soo jeedinayaa waxa laga jaray waa 20% iyagana in la siiyo isaga oo dhamaystiran.

Dhawr meelood ayey kaga jirtaa in 80% la siiyo, markaa waxaan leeyahay waa in la siiyo haddii uu noqdo ka hawlgabka galay, ka dhintay ilaa carruurtiisu gaadhayaan 15 jir iyo ka dhaawacma ee hawsha ciidanka sii wadi kari waaya.

**Qodobka 24aad** wuxuu yidhi wax ka bedel kasta oo ku saabsan xeerkan waa inay soo jeedisaa hay'ada xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka sida ee Jamhuuriyadda Somaliland, ka dibna waa inay ansixiyaa Golaha Baarlamaanku.

Halkaas waa in la saxaa oo haddii la soo jeedinayaa waxa soo jeedinaaya Madaxweynaha waa in lagu qoraa, oo iyadu waxay keenaysaa Golaha Wasiirada, Madaxweynahaana soo jeedinaaya Golaha Barlamaankuna way ansixinayaa.

**Qodobka 25aad** waxa uu isna sheegayaa xeerku wuxuu dhaqan gelayaa marka Baarlamaanku Anixiyo madaxweynuhuna dhaqan gelyo, laakiin xeerku wuxuu ku dhaqan galayaa marka labada Gole anixiyaan Madaxweynuhu uu saxeexo.

Xeerkan inta kaliya ee ka dhimani waxa weeye xeerkaa darajada iyo xeerkaa ciidmada kala duwan oo dhamaystiran sidaas ayaan ku wanaagsan yahay.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan (11min 25sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, mudanyaasha sharafta leh waa idin salaamayaa. Bacda salaan malaha xoghayntu way aragtaaye saddex page oo dheeriya ayaa ku jira oo page 4 ayuu xeerku ka bilaabmayaa.

Xeerkan guddoomiye iyo xeerarkeena inta badan mabaadiidu kuma qorna, xeerkana kuma qorna oo ah xeer aad u muhiim ah oo waxtar inoo leh, in lagu qoro sababtiisuna muhiim weeye, sababta loo curinayaa waa daryeelka dadku u baahan yahay, khaasatan ciidankeena qalabka sida. Waad sareemaysaa in markaba qodobadii xeerka la gelayo. Markaa waxa haboon Guddiyadeena iyo inaguba xeerka mabaadiisa oo kooban oo xitaa paragaaf ka noqotee in lagu qoro.

Xeerka magaciisu waa Xaqsiinta iyo hawlgabka waa laba eray oo waxaan u qaatay in xaqsiintana wax laga odhan doono, hawlgabkana wax laga odhan doono, laakiin waxa

cadaatay inay hal kalmad tahay, haddii ay hal kalmad tahayna in la qaato weeyaan Hawlgabka.

Waayo hawlgabka mar haddii hawlgabka la soo qaado xaqsiin ayaa ku jirta, markaa waxaan odhan lahaa intaynu iska dayno hadalka badan aynu nidhaa “**Xeerka Hawlgabka Ciidamada Qaranka**”.

Eray bixinta haddii eegto xuquuqda hawlgabka wuxuu ku turjumayaa Xuquuqda uu yeelanayo qofka hawlgabka galayaa.

Xuquuq bixin “**xaq uu yeelanay qofka gaadhay hawlgabka xaqsiinta**”waa isku mid xaqiiqdii.

Markaa waxaan soo jeedinayaa in laga daayo Xaqsiinta oo la yidhaahdo “**Xeerka Hawlgabka Ciidanka**”.

**Qodobka 3aad** waxa ku qoran u jeedooyinka xeerka, xaqiiqdii qodobkaasi kuma haboona meesha. Wuxuu ka hadlayaa waajibaad in la qabto. Haddii aad waajibaad la qabto ka hadlaysid u jeedooyin ka hadli maysid.

**Qodobkan 5aad** Halka u jeedooyinku ku qoran tahay **farqada 1aad** waxa ku qoran hawlgabka la siinayaa kama badnaan karo celceliska musharahka la siinayo 80%. Saldhiga mushaharku sanadkii waxa weeye hal bil ayaa mushaharka la siinayaa. Markaa waxaan leeyahay halkan kuma cadda eaa in halkaa la raaciyaa Hawlgabka xaqsiintu kama badnaan karo saldhiga mushaharka 80% bil mushaharkeed.

Halkan waxa ku qoran ciidamo hawlgabkoodu gaadhayso muddo 10 sanno saldhiga mushaharka bil mushaharkeed.

**Qodobka 11aad** xaquuqda hawlgabka iyo xaqsiinta. Waxaan idhi hawlgabka iyo xaqsiinta kala reebo, waxa weeyaan xuquuqda hawlgabka. Halkan mar labaad waxa ku qoran hawlgab bile ah oo 40% saldhiga mushaharkiisa. Waxay noqon kartaa in 40% mushahrkiisa loogu dhufto inta sanadood ee uu shaqaynayey. Waxa kale oo la mid ah 50% mushaharka oo loogu dhufanayo inta intii sano ee uu shaqaynayey.

Waxa ku jira halkan laba wax oo shaqaynaya hay’ada xeerka maamulaysa, waana inay hay’daasi maamushaa. Waxa kale oo iyana hlyana ku qoran waxa saxeexaya madaxweynaha.

Waxa iyana ku jirta xanduuqa dhaqaalaha oo uu yeelanay, waxa ku in mushaharka laga jara 20%, oo haddii askarigu qaato 100,000 SL.SH waxa laga jarayaa 25000 SL.SH. Hawlgabkan macnaheedu waxa weeye in lacagtaa laga jaray in la biiriyo oo dhiganto si ay xaq u noqoto.



Lacagta laga jaro ciidamada haddii ay gaadho hal milyan, waxa Iyana wax ku daraysa oo 50% ku daraysa Wasaarada maaliyadda, laakiin waa in marka hore la sameeyo sanduuqa oo uu shaqeeyaa, hay'addii waxaa maamuli lahaydna aad samaysaa.

Waa in la wadaagaa xeerkan si xeerkani u shaqeeyo oo uu u dhaqangalo, waana xeer aad u wanaagsan, inagu waa inaynu ka shaqaynaa wixii xildhibaanadu ku soo dareen oo xeerka daba soconaa.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid (28min 02sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye iyo mudanayaal waa idin salaamayaa. Xeerkan horta marka la leeyahay hawlgab iyo xaqiin waa laba arrimood oo kala duwan. Hawlgabku waxa weeye marka qofku muddo cayiman si xidhiidh ah u shaqeeyo, haddii ay tahay 20 sano wuxuu qaadanayo lacag joogto ah. Kii aan gaadhin 20 sano oo aan xidhiidh ahayn ee inta ka horaysa shaqada ka baxa, waxa uu yeelanayaa xaqiin sanadadii uu shaqaynayey oo bil mushaharkii looga soo qaado oo intii sanadihii uu shaqaynayey loogu dhufto. Horta sidaas ayaa midna xaqiin loo yidhi mid Hawlgab loo yidhi.

Guddoomiye xeerkan markaan sidaa u eegay page ayaa ka maqan oo page 2 wuu ka maqan yahay horta, markaa laba page 4 ayaa ku jira oo aan waxba ku kala duwanayn oo laba qodob oo dastuurka oo la xusay midna 148 midna 149 lagu sheegay oo aan dastuurkaba ku jirin. Midna la saxay malaa marka dambe oo 123 iyo 124 lagu sheegay, labadaas eray ayuunbay ku kala duwan yihiin labadaas warqadood ee isku page 4 ah ee page 3 hareeraha ka xiga.

Page 2 maqani wuxuu la maqan yahay, markaad page 3 eegto. Waxa ku qoran wax u eeg tasmada. Tasmadu waxay ahaan jirtay qodobada iyo qaybaha xeerka oo inta la qoro oo page laga helayan inta lagu qoro, sida page 3 ku qoran. Markaa page kuma qorna qodobo iyo qaybo taxan ayuunbaa qoran, page nambarkii laga helayaana kuma qorna. Waana intii ka dambaysay 18aad, markaa page maqan ayey la maqan yihiin.

Eray bixinta qaybta ugu dambaysa ee tusmo u eekaha, waxaan eeke u leeyahay dee qaabkii tusmana waa loo dhigay page nambarkiina ma xusna, sideedaba markuu xeerku yahay xeer weyn oo qodobadoodu badan yihiin iyo qaybahoodu ayaa la isticmaalaa tasmada. Haddii uu xeerku xeer kooban iska yahay, inta badan tasmaba looma baahdo. Maraa tasmada aan ka tuurno ama aan tasmada soo dhamaystirno oo ilaa page nambarka ha yeelato oo ha la saxo.

Qodobka ugu dambeeya tasmada ee 26aad wax ka bedelka iyo xeerka waa amendment ah, xeerku ma gaadhayo 26aad qodob tasmadiina 26 qodob ayey sheegaysaa. Qodobkaa wax ka bedelka iyo kaabista waa 24aad qodob markaa ha la saxo.

**Qodobka 1aad** oo xeerka magaciisa ah. Saddex farqadooda ayaad moodaa in la hoos dhigay. Xeerkan waxa loogu yeedhayaa xeerka Xaqaainta iyo hawlgabka Ciidanka

Qalabka Sida ee Jamhuuriyadda Somaliland oo kala ah; Ciidanka Qaranka, Ciidanka Booliska iyo Ciidanka Asluubta. Sida ku qeexan dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobkiisa 123aad iyo 124aad.

Laba, Xeerkan waxa kale oo lagu dabaqayaa ciidanka Sirdoonka Qaranka oo Ciidanimadooda maxkamad dastuuri ah ee Jamhuuriyadda Somaliland go'aan ka soo saartay.

Saddex, sidoo kale waxa xeerkan lagu dabaqayaa ciidanka kale ee Qaranka ee hoos yimaada Ciidanka Qaranka iyo Ciidanka Booliska, kuwaasi oo kala ah Ciidanka socdaalka, Ciidanka badda iyo Ciidanka dab-damiska, intaas waxa la hoos dhigay magacii xeerka.

Waxaan odhan lahaa magac xeerku waa inuu noqdaa in kooban oo magaciisa guud uun tilmaamaysa oo xeerkan waxa loogu yeedhayaa xeerka Xaqsiinta iyo Hawlgabka ciidamada Qalabka sida ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Saddexdan farqadooda meesha ku waa cida xeerka lagu dabaqayo, markaa qodob cusub ayey intani noqonaysaa oo la odhanayo qodobada xeerka ama yaa lagu isticmaalayaa ayaa loo adeegsanayaa oo lagu dabaqayaa.

Sidoo kale waxa xeerkan lagu dabaqayaa kuwa kale ee hoos yimaada Ciidanka Qaranka iyo Ciidanka Police, kuwaas oo kala kala ciidanka Socdaal, Ciidanka Dab damiska iyo Ciidanka Badda. Seddexdaas ciidan ee aynu soo sheegnay midna inaan lagu xukumin mid Taliska Police, midna in aan laga xukumin taliska Ciidanka Qaranka, waxay ku hoos yimaadaan in Wasaarada Arrimaha Guduhu kulmiso. Ciidanka Socdaalku Wasaarada Arrimaha Gudaha ayuu hoos yimaadaa, ciidanka badda waakii xeerkiisu ina soomaray, waataan ku ansixinay inuu Wasaarada Arrimaha Gudaha hoos yimaada, dee markaa xeerarku way is khilaafayaan. Haddii aynu qaarna qorno iyaga oo hoos imanaya talisyadii ciidamada, qaarna aynu qorno inay hoos yimaadaan wasaarada, markaa ha loo raaco sidii xeerarka kale qorayeen. Yaan qalad cusub oo aan kii horena tir-tirayn oo khilaafuun abuuraya meesha ha laga ilaaliyo ayaan filayaa.

**Qodobka 3aad**waxa inoogu qoran xadka xeerka. Xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha waxa lagu maamulayaa dhammaan arrimaha la xidhiidhka xuquuqda hawlgabka. Haddana qodobkii 4aad laynka labaad waa laba layn oo aan la lambarin, waxaan odhan lahaa 1 iyo 2-gii ha lagu qoro.

Ka 2aad ayaa hadana intii lagu soo celiyey xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha ka dhasha waxa lagu maamulayaa dhammaan arrimaha ka dhasha xaquuqda hawlgabka iyo xaqsiinta Ciidanka Jamhuuriyadda Somaliland.

Intii **qodobka 3aad** sheegay ayuunbaa haddana **qodobka 4aad** farqadiisa 2aad la soo dhigay, waana hay'adda xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidamada qalabka Sida.

Waxaan odhan lahaa **farqadaas 2aad** sidan ha loo qoro “Hay’ada xaqsiinta iyo Hawlgabka ciidamada qalabka Sida, waxay xaqsiinta iyo Hawlgabka u raacaysaa xeerkan iyo xeer nidaamiyayaasha ka dheegma”.

**Farqada 1aad** waxa aasaaskeeda la siiyey Madaxweynaha, anigu waxaan odhan lahaa faahfaahinta xeer nidaamiyayaasha ha lagu soo saaree, aasaasida hay’adaasi waa hay’ad muhiim ah. Aasaasiseeda sidii horeba loo sheegay, qaab dhismeedkeeda iyo waajibaadkay qabanayso iyo qaabkay u shaqaynayso iyo cidda ay hoos imanayso xeerkani ha waajibiyo ayaan odhan lahaa.

**Qodobka 5aad** ujeedada xeerka; isma waafaqsana magaca qodobka iyo nuxurka farqadiisu, oo u jeedana waa la qoray, waanan raacsanahay in aanay u jeedo ahayn oo ay tahay sidii lagu mutaysan lahaa xaqsiinta iyo Hawlgabka, mutaysigii lagu mutaysan lahaa ayaa meesha taxan. Laakiin maaha u jeedadii xeerka, waxaan odhan lahaa xeerka u jeedadiisa si gooni ah ha loo qoro, waxaanan soo jeedinayaa inuu noqdo;

**“U jeedada xeerku waa in la dejiyo nidaamka xaqsiinta iyo Hawlgabka xubnaha Ciidanka Qalabka sida”** u jeedo taasaa noqon karta.

Inta kale ee ku hoosa qoran ee ah sida lagu mutaysto waa nin laga dhigaa **Qodobka 6aad** oo Cusub sababaha mutaysigana lagu qoraa. **Qodobka 6aad: Mutaysiga Xaqsiinta iyo hawlgabka iyo qadarkooda** oo inta meesha ku qorana farqado ay noqoto.

**Qodobka 6aad Asbaabaha hawlgabka iyo xaqsiinta: Farqadiisa 1aad** “Xubnaha Ciidamada Somaliland ma yeelan doonaan xuquuq hawlgab iyo xaqsiin, haddii xukun maxkamadeed oo ciqaab ahi. Qodobo dambe ayaa sheegi doonaa oo ka hadli doona oo odhan doonaa; haddii xubinta uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo aan baabiinin xuquuqdii ciidanimo xukun ciqaabeed oo maxkamadeed, haddana aan baabiin xuquuqdii Ciidanimo. Maxkamada wax ma baabiisee qof ayaa lagu xaqtiray.

Qof muddo soo shaqeyey oo xukun maxkamadeed ku dhacay oo 30 sanno soo shaqeyey, xaq maaha in la xaq tiro. Markaa waxaan odhan lahaa sida qodobo dambe sheegayaan in qofku mudadii uu shaqeyey in la xaq tiro. Waxaan soo jeedin lahaa inmeesha laga saaro qodobkaas.

**Qodobka 7aad Xarafka J;** Waxay xaqtiraysaa dablaha iyo aliflaha ee ruqsaysata, iyada oo mudadeeda xidhiidhsan oo aan gaadhin 10 sanno. Haddii aynu u fiirsano farqadaas xarafka J “Marka xubinta ciidan ee iskeed u ruqsaysata ka mid tahay xubnaha ku tilmaaman qodobkan farqadiisa, **Qodobka 5aad farqadiisa 3aad:** Waxa la siinayaa xaq marka mudadiisa shaqo gaadho 10 sanno am aka badan. Haddii muddo ka badan ay gaadhi waydo la siin maayo markaa.

Waxaan odhan lahaa haddii uu ka yaraado 10 sanno ama ay noqoto 9 sano iyo badh yaan la xaq tirin ha loogu dhufto xaqiisa bil mushaharkeed, ileen waatii mudada uu shaqaynayey laga jarayey lacagta xaqsiinta iyo Hawlgabka.

**Qodobka 11aad** Xaquuqda xaqsiinta iyo Hawlgabka: saraakiisha iyo Saraakiil xigeenka, waxa lagu xusay qodobkan oo xaqsiin noqonaysa. Balse markay shaqeeyaan 10 sano in ka badan 10 sanno ilaa 19 sanno , 21sanno ilaa 24 sanno , 30 sanno ilaa 39 sanno, iyo 40 sanno wixii ka badan. Waa heerar uu mar walba wax gooniya yeelanayo. 10 sanno wixii ka yar sanadkiiba bil ayaa loogu dhufanayaa, 10 sanno wixii ka yar waa tii xaqaba loo diidayey, 10 sanno ilaa 19 sanno waa sanadkii bisha loogu dhufanayey, 21 sanno ilaa 24 sanno waxa loo jarayaa lacag bile ah oo joogto ah, waxa ka maqan 20 sanno oo dhinacba aan la raacin. Markaa waxaan odhan lahaa halkaas 20 sanno ilaa 24 sanno ha laga dhigo.

Qodobka waxa kale oo ka maqan xuquuqda hawlgabka iyo xaqsiinta sareeyayaasha oo warbixinta lagu sheegay in aanay saraakiil ahayn oo iyaga loogu yeedhayo sareerayaal. Mar haddii aan sareeyayaasha lagu sheegin saraakiil oo eray bixintuna tilmaamtay, waa in xeerka gudahiisana lagu tilmaamaa sareeyayaal iyo xil iyo waajibaad u gooniya waana in si gaar loo tixgeliyaa.

**Qodobka 11aad** marka uuu ka hadlaayo xaqsiinta iyo hawlgabka taasna laguma xusin ee waa in lagu xisaabtamaan, ha la saxo.

**Qodobka 12aad Da'da Hawlgabka.** Waxaan taageerayaa sidii ay xukumadu u soo gudbisay runtii, oo guddidu way koobtay waanay yaraysa. Hawlaha fisikalka ah dadku siday u kala darajo yar yihiin ayey hawlaha fisikalka ah u kala badsadaan. Haddii uu kaa gaboobo oo ciidankii kuwa da'da way meesha ku ilaaliso, ciidankaagaasi meesha ku tamarin maayo. Kuwa hawlaha fisikalka ah qabanayaa waa inay hore u hawlgabaa oo kuwa maamulka, istaraajiyada iyo maskaxda hayaa way ka dambayn karaan kuwaas kale.

Waxaan odhan lahaa sida xukumadu u soo dhigtay qodobka 12aad ha la raaco oo ha laga daayo siday Guddidu u dhigtay.

Labada baragaraf ee shaxda hoos yaala waa shaxda qodobka 12aad laba baragaraaf ayaa hoos ayaala, shaxduna lambar ma leh, labada baragaraafna lambar ma leh. Waxaan odhan lahaa shaxda lambar ha la siiyo, labada kalena ha la siiyo kaw iyo laba.

Baaragaraafka hoose ee u dhigan sidan “Hawlgabka waxa loo eegayaa taariikhda shaqada la qoray, erayda loo eegayaa ha loo bedelo, **laga soo tirinayaa** marka xaqa la xisaabinayo ayaa laga soo tirinayaa maalintii shaqada la qoray, markaa waa **loo eegayaa** ha loo bedelo, **Laga soo tirinayaa.**

**Qodobka 13aad, Xubnaha Naafada:** sideedaba naafo waa hallbawle hawlgabay ama qof laxaadkiisu si rasmiya u Tamar gabay weeye, ama ha fududaato, ama dhex dhexaad ha

noqoto ama ha cuslaato. Waxaad moodaa farqado 2aad halkan lagu qoray oo saddex xaraf ee ah A, B iyo C. lacag korodhsiimo ah oo qofka loogu darro oo xaqii uu ku yeelan lahaa xiliga uu soo shaqeeyey ayaa A waxay leedahay; “**A**) 10% saldhiga Mushahariisa haddii uu yahay naafo fudud, **B**) 25% saldhiga mushaharkiisa haddii uu yahay naafo culus, **C**) waxay leedahay 50% saldhiga Mushahariisa haddii uu yahay naafo joogta ah. Markaa waxaan odhan lahaa labada horeba waa joogto oo naafada fudud iyo naafada dhexeba waa joogto, **markaa ta dambe waxaan leeyahay ha dhaho naafo aad u culus.**

Naafada marka ay baxnaano joogo oo aanay ka soo rayn lahayn ayaa saddexaas lagu kala qiimayn karaa.

**Qodobka 16aad Joojinta, waayida iyo Hakinta xuquuqda hawlgabka,** waxaan ku bedeli lahaa joogsashada xuquuqda Hawlgabka iyo dib u dhigista Bixinteeda.

**Farqada 1aad** ee u qoran sidan “**Dhimashada xubinta ciidan ee Hawlgabka, dhaxlayaashiisa (Xaaska, ama xaasaskiisa, hooyadii iyo Aabihii) xitaa ubadkii laguma xusin oo qawska laguma xidhin.**

Dhaxlayaashu intan way ka badan yihiin oo ubadku hadaanay jirin, waxa meesha imanaya dhaxlayaal kale oo marka hore xijaabnaa oo meesha soo fashiisanaya, markaa shareecadaa qof kasta oo dhintay cadaysay dhaxlayaashiisa. Waxaan leeyahay tafaasiisha ha laga daayo shareecada ayaa cadaysee dhaxlayaasha oo kaliya ha lagu daayo.

Isla **Qodobka 16aad** baragaraafka u dambeeya ee aan lambarka lahayn, waxaan soo jeedin lahaa in farqad saddexaad laga dhigo.

Xubinta ciidan ee uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo ciqaabeed oo aan ka baabiin xuquuqdii ciidanimo, waa taan ka hadlayey oon lahaa marbaa xukun maxkamadeed imanayaa, isaga oon baabiinin xuquuqdii Ciidanimo. Halka hore waxa la yidhi mar walba wuu baabiinayaa oo kale ayaa lagu xusay.

Waxaan odhan lahaa, xubinta waxa lagu sheegay xubinta ciidan ee uu ku dhaco xukun maxkamadeed ee aan ka baabiin xuquuqda ciidanimo, waxa laga hakinayaa xuquuqdii hawlgabka iyo Xaqsiinta mudada uu xabsiga ku jiro.

Xuquuqdii lama baabiin ayaa la yidhi, markaa xuquuqdaasi ma mushaharkiibaa qaadanayaa oo tii xaqsiinta iyo hawlgabka ayuu waayayaa, halkaasi ma cadda waayo haddii uu mushaharkiisii qaadanayo oo xuquuqdiisii kale socoto, qofkaasi isba odhan maayo xaq isiiya, oo mushaharkii wuu qaadanayo ayaa uga badan.

Waxaan u fahmay qof aan mushaharna lahayn, hadana xuquuqdii laga hakinayo hawlgabka iyo xaqsiinta ilaa inta uu xabsiga ka soo baxayo. Qodobkaas waxaan odhan lahaa macnihiisa aad ha loo raadiyo, haddii aanu mushaharku u soconayn qofku xaqbuu

u leeyahay in marka xadhigu ku dhaco ciidankii uu ka baxo, ileen lama baabiin xuquuqdiisii maxkamadi may baabiine, inuu xaqiisii qaadan karo ama uu isagu dib u dhigan karo inta uu qaadanyo, inta uu qaadanayo isaga la siiyo doorashada haddii aanu xeerku ka qaadin.

**Qodobka 18aad** xarafka (T) ee u dhigan sidan “Inuu ubad ka tagay ilaa ka ugu yar da’diisu gaadhayso 15 sanno, waxa si gaar ah loogu xanaanaynayaa in la siiyo lacag u dhiganta 80%, saldhiga mushaharkiisa bil kasta”.

Askariga dhinta ubadkiisa waa la siinaya mushaharka u dhigma 80% ilaa ay 15 sanno gaadhayo, laakiin waxa ku qoran askariga ku dhinta isaga oo ka hortaga khatar dagaal, dambi iyo masiibo dabiici ah. Ka inahaas ku dhinta ee si caadiya u dhiman, ayaa la yidhi ubadkiisii inta ay 15 jir gaadhayaan.

Haddii askariga dhintay ilmahiisa ugu yari uu gaadhayo 13 sanno, waxa uga dhiman 2 sanno inuu gaadho 15 jir, waxa la siinayaa xuquuqda xaqsiinta iyo Hawlgabka ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan ee xarafka (B).

In xaqsiinta iyo hawlgabka marka askarigu dhinto isaga oo ilmiisa u yar sanad ama lix bilood u hadhsan yihiin da’da 15 jirta in xaqiisa lagu daboolo mudadaas yar ilama qurux badna.

**Qodobka 21aad** abuuritaanka sanduuqa Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka Sida. Waxaan soo jeedinayaa farqada 1aad xarafka (T) ee 5% laga jaro saldhiga mushaharka ee saraakiisha iyo saraakiil ku xigeenada loo kala saaro afar heer;

**Qodobka 21aad farqadiisa 1aad** xarafka (B), waxay waajibinaysaa in 2.5% laga jaro saldhiga mushaharka aliflayda. Xarafka (T) waxay waajibinaysaa in dhammaan ciidanka kala duwan laga jaro 5% mushaharkooda, marka laga reebo aliflayaasha iyo dablayaahsa, waxaan soo jeedinayaa in tafaaiil laga bixiyo dheeriya oo la yidhaa saraakiisha iyo saraakiil ku xigeenada 3%, saraakiisha hoose xidigle ilaa dhamme 3.5%, saraakiisha sare gaanshaanle ilaa gaanshaanle sare 4%, sareeyayaasha 5%. Mar haddii xadhiglaha iyo sareeyuhu marka lacagta uu qadanayo isku lacag qaadanayn inay lacagi ka wada godo maaha.

Ka lacagta badan inta badani ha ka godo, halkan lka lacagta yar aynlacagta yari ka godo.

**Farqada 2aad ee Qadobkan21aad** waxay u dhigan tahay, “Wasaarada Maaliyadu waxay Sanduuqa xaqsiinta iyo Hawlgabka Bil kasta ku biirinaysaa xadi lacageed oo le’eg lacagta laga soo jaray ciidamada”.

Dawladihii hore qof kasta inta laga jaro in le’eg ayaa loogu darri jiray. Waxaan odhan lahaa oo aan soo jeedinayaa in wasaarada lagu waajibiyo inay bixiso inta ciidanka laga jaray oo 100% ah.

**Farqada 2aad ee Qadobkan 21aad** ee u dhigan sidan; “ Waxa loogu shubayaa xuquuqda iyo xaqsiinta iyo hawlgabka Ciidanka Qaranka xisaabta bank dhexe ka furan, taas oo lagu ururiyo lacag bileedka ku qeexan Farqada 1aad iyo 2aad ee Qodobkan”.

**Waan yar hagaajiyey oo waxaan idhi** “ Xisabta socota ee Sanduuqa xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka qaranka eek a furan Banka dhexe Jamhuuriyada Somaliland ayaa lagu ururinayaa lacag bileedka ku xeeqan farqada 1aad iyo 2aad ee qodobkan.

**Xarafka B,** Lacagta ku jirta Sanduuqa Xaqsiinta iyo Hawlgabka Ciidanka Qalabka sida looma weecin karo sifo kale oo aan ahayn xaqsiinta iyo Hawlgab. Waxaan leeyahay looma weecin karo inta badan soo noqotay ha laga saaro.

**Qodobka 22aad** xeer nidaamiyaha xeerka: Hayada Xaqsiinta iyo hawlgabka ciidamada qalabka sida marka ay dhagaysato talo soo jeedinta taliyayaasha ciidanka qalabka sida JSL iyo Lataliyayaasha sharcigu wuxuu soo saarayaa xeer nidaamiyaha xeerka.

Waxaan leeyahay yaanay hayadu soo saarin xeer nidaamiyaha, waa inuu soo saaraa Wasiirka Wasaarada Gaashaandhigu.

Waxaan idhi “Wasiirka gaashaandhigu marka uu dhagaysto Talaiyayaasha Ciidanka Qalabka sida iyo Hay’adaha xaqsiinta, waxa uu soo sarayaa xeer nimaamiyaasha lagu faahfaahinayo laguna dhaqan gelinayo xeerkan”.

**Qodobka 24aad** waxa ka bedelka xeerka Xaqsiinta iyo Hawlgabka waa inay soo jeedisaa Hay’da xaqsiintu, ka dibna ay ansxiyaa Golaha Xeer dejintu.

Qodobkani waxa uu ka horimanayaa cidii dastuurku siiyey in mooshin ay ku keento xeerka oo xukumada ah, markaa qodobkaas meesha ha laga saaro ayaan leeyahay.

**Cawad Cali Maxamed**  
Agaasimaha waaxda H/Qoraalka G/Wakiilada

---

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI

---